# JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

## DASTUURKA DALKA JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA: 1960

## QAYBTA 1aad

## QODOBO GUUD:

### QODOBKA 1aaD

### JAMHUURIYADDA:

1)- Soomaliya waa Jamhuriyad madax-bannaan oo leh Dawlad demoqaaradi,dhexdhexaad iyo wakiil buuxda ah. Dadka soomaalilyeed waa mid aan kala qaybsami Karin.

2)- Qaranimoda /Dawladnimada waxaa iska leh dadka iyaga ayaana u oofsan kara qaababka ay u gooyaan Dastuurka iyo sharciyada Dalka. Majirto qayb dadka kamid ka ah ama shakhsi si gaar ah isku lahaysiin Kara adeegsiga awoodda Dawladnimo/Qaranimo.

3)- Diinta Islaamka ayaa noqonaysa Diinta qura ee Dalka.

4)- Calanka Qaranka waxuu noqonayaa midabka buluug barxan oo shaxan afar geesle ah oo uu dhexda/bartamaha uga sawiran yahay xiddig cad oo shan gees isla eg leh.

5)- Astaanta Qaran ee soomaaliya waxay ka koobnaan doontaa bir xardhan oo buluug barxan ah oo geesaha dahabi ka ah xambaarsan xiddig Qalin ah oo shan gees leh. Birta xardhan oo ku dul qotonta/fadhida si siman oo leh shan barood oo sida jaran jarta Moorish oo kale ah, labada dhinac ee barahana u kala qayb sanyihiin laba qayb oo siman, waxaa sida ama kor u haya laba shabeel oo qaab dabiici ah u qotoma is eegayana kuna taagan laba warmood oo si is dhaaf ah umaraya barta birta xardhan hoosteeda, iyo labo caleemood ee geedka baarka oo qaab dabiici ah ay ugu wareegsan tahay mara cad .

## QODOBKA 2aad
## DADKA:

1)- Dadka waxay ka koobanyihiin dhammaan mawaadiniinta.
2)- Habka lagu noqonayo laguna waayi karo muwaadinimada waxaa qeexi doonaa sharciga.
3)- Majirto qof loo diidi karo muwaadinimada ama looga qaadi karo sabab la xiriirta siyaasad awgeed.

## QODOBKA 3aad:
## SINNAANTA MUWAADINIINTA:

Dhammaan muwaadiniinta Dalka iyagoon loo kale soocin xag jinsiyadeed, Dal uu asal ahaan ka soo jeedo, dhalasho, luuqad, Gobal, jinsi (lab/dheddig), dhaqaale ama heerka aqoonsi ee uu Bulshada ku dhex leeyahay ama aragti/rayi, waxay yeelanayaan xuquuq iyo waajibaad simman/isla eg sharciga hortiisa.

## QODOBKA 4aad:
## DHULKA/XUDUUDA DALKA

1)- Xuduudda Dalka/Qaranka waa muqaddas lagumana xad-gudbi karo.

2)- Xuduudda Qaranka/Dalka waxay ku fidsantahay xuduudda Qaaradda, Jasiiradaha, xuduud badeedka, qayb-dhuleedka, hawada sare iyo gabal Qaaradeedka.

3)- Wixii dib u habayn ama isbeddel ah ee lagu samaynayo xudduudda Dalka/Qaranka waxaa waajib ah in uu jideeyo sharci ay aggolaadeen ansixiyeena shan meelood afar meel ($^4/_5$) aqlabiyada xubnaha Baarlamaanka Dalka/Qaranka.

4)- Sharciga ayaa goyn doona qaybaha dhulka iyo sifaha dhulka ee ay Dawladda leedahay iyo kan ururada dadwaynaha ay leeyihiin, sharciga ayaana qeexi doona tilmaanta iyo aqoonsiga sharciga ah ee arrintaasi la xiriirta.

## QODOBKA 5aad.
## SARRAYNTA SHARCIGA.

1)- Ururka/Hay'adda Dawladda iyo xiriirada ka dhexeeya Dawaladda iyo dad kale, Dadwaynaha ama shakhsi khaas ah, waxaa xukumi doona sharciga.

2)- Tilaabooyinka maamul ee aan waafaqsanyn sharci iyo tallaabooyinka sharci dejinta ee ka soo horjeeda Dastuurka, waxaa lagu nasakhi karaa dalabka cidda danaynasa oo waafaqsan Qodobada Dastuurka.

## QODOBKA 6aad
## KAALINKA AY JAMHURIYADD KAGA JIRTO NIDAAMKA CAALAMKA

1)- Qaanuunada la wada oggolyahay caam ahaan ee sharciga caalamiga iyo heshiisyada caalamiga ee ay Jamhuriyaddu sidii la rabay u soo gabagabaysay loona daabacay hannaanka loo qoro sharci dejinta ayaa yeelanaya awoodda fulineed ee sharciga.

2)- Waxay Jamhuriyadda qaadacaysaa in dagaal yahay qaab lagu xalliyo khilaafyada caalamka.

3)- Waxay oggoshahay in iyadoo ku xiran shuriidaha la siman ee dalalka kale, ay u xadayso dawladdeeda qawaaniin lagama maarmaana u ah dejinta nidaamk lagu sugayo nabadda dalalka adduunka.

4)- Jamhuriyada Soomaaliya waxay kobcinaysaa Midowga Gobollada Soomaaliyeed, waxayna dhiirigelinaysaa isku xirnaanata dadyowga Adduunka, gaar ahaana dadyowga Afrika, iyo kuwa Islaamka.

## QODOBKA 7aad
## XUQUUQUL–INSAANKA

Sharciyada Jam. Soomaaliya waxay waafaqsanaan doonaan, inta ilaa hadda la adeegsan karo, mabadi'da Bayaanka caamka ah ee xuquuqul Insaanka oo uu soo saaray Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 10ki Disembar, 1948.

## QAYBTA II.

## XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADYADA AASAASIGA AH EE MUWAADINKA

### QODOBKA 8aad
### XAQA COD BIXINTA:

1)- Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha sharcigu uga baahan yahay waxuu xaq u yeelanayaa in uu cod bixiyo waxna doorato.

2)- Cod-bixinta waxay noqonaysaa shakhsi, isku mid, xor iyo qarsoodi.

### QODOBKA 9aad
### XAQA QABASHADA XIL DAWLADEED

Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga u baahanyahay waa qaban karaa xil dawladeed sidaas oo kale.

### QODOBKA IOaad
### XAQA DACWADA

1)- Muwaadin kasta waxuu yeeelanayaa xaqa uu dacwad qoraal ah ugu gudbisan karo Madax-waynaha Jamhuriykadda, Baarlamaanka iyo Dawladda.

2)- Dacwad kasta oo si waadax ah xaqiiqada ku salaysan waa la eegayaa/tixgalinayaa.

### QODOBKA 11aad
### XAQA DEEGAANKA

1)- Muwaadin kasta waxuu xaq u leeyahay in uu dego si xor ahna ugu dhex safro meel kasta oo ka mid ah dhulka Soomaaliya lagamana masaafurin karo Dalka.

2)- Muwaadin kasta waxuu xaq u leeyahay in uu safar dalka dibaddiisa ugu baxo dibna ugu soo laabto.

## QODOBKA 12aad:
## XAQA KA MID NOQOSHADA URUR SIYAASADEED:

1)- Muwaadin kasta waxuu xaq u leeyahay in uu ka mid noqdo, kana qayb qaato xisbiyo siyaasadeed idan la'aan iyadoo ujeedadu tahay in uu si demoqaraadiyad iyo nabad-gelyo ah uga qayb qaato qaabaynta siyaasadda dalka.

2)- Xisbiyada iyo Ururada siyaasadeed ee qarsoodiga ah lehna sifo militeri ee Urureed ama mad hab qabiil waa mamnuuc.

## QODOBKA 13aad:
## XAQA SAMYSASHADA URURO GANACSI.

1)- Muwaadin kasta waxuu xaq u leeyahay in uu samaysto Urur Ganacsi ama uu ku biiro si uu u ilaashado dantiisa dhaqaale.

2)- Ururada Ganacsi ee u habaysan si waafaqsan mabaadi'da demoqaraadiga ah waxaa loo tixgelinayaa dad xeer–beegti xagga sharciga ah.

3)- Ururada Gancsi ee ah dad xeer-beegti ah waxay ku wada xaali karaan in ay noqdaan qandaraaslayaal shaqaale wadareed oo isku xira xubnahooda.

## QODOBKA 14aad:
## XUQUUQDDA DHAQAALE SAMAYSASHO

1)- Muwaadin kasta waxuu xaq u leeyahay in uu samaysato yeeshana dhaqaale aan ka baxsanayn xuduudda sharciga oggolyahay.

2)- Sharciga ayaa xakamayn doona ku takrifalka iyo ku xadgudubka wax-soo-saarka dhaqaalaha ee Dalka.

## QODOBKA 15aad:
## WAAJIBNIMADA U DAACAD AHAANSHAHA DALKA

1)- Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah u daacad ahaanshaha Qaranka iyo Dawladda.

2)- Difaaca dalka Hooyo waa wajib muwaadin kasta saran.

3)- Shaqada ciidanka xoogga/jeeskhka waxaa xukukmi doona sharciga.

## QAYBTA III
## XUQUUQDA IYO WAAJIBAAD AASAASIGA AH EE QOFKA

## CIWAAN I

## XUQUUQDA XURRIYADDA:

## QODOBKA 16aad
## XUQUUQDA XAGGA NOLASHA IYO SHARAFKA SHAKHSI.

1)- Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolol iyo sharaf shakhsiyadeed.
2)- Ma jiri dooono go'aan xadaynaya xuquuqaha noocani.
3)- Sharciga ayaa qeexi doona dembiyada dilka iyo dembiyada ugu waawayn ee liddiga ku ah nolsha Bina-Aadanka ama sumcadda Qaranka /Dalka.

## QODOBKA 17aad
## XORRIYADDA SHAKHSIYADEED

1)- Qof kasta waxuu xaq u leeyahay xorriyad shaqsiyadeed.
2)- Ku qahridda nooc/qaab kasta ee is addonsi ama cabiidnimo waxaa lagu mutaysanayaa ciqaab fal-dambiyeed.
3)- Qof lama xabbisi karo laguma samayn karo wax xorriyad ka qaadid shakhsiyadeed ah ilaa in lagu qabto isagoo fal-dembiyadeed cad faraha kula jira mooyaane, ama uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo awood u leh iyadoo la qeexayo asbaababha arrintaasi iyo hababka iyo sida uu sharciga tilmaamo.

4)- Xaaldaha ay timaaddo baahi deg-deg ah oo sharcigu si toos ah u tilmaamayo, xukumadda maamulka ee awoodda u leh waxay qaadi kartaa tallaabo KMG ah oo si aaan daahid lahayn lagu gaarsiinayo xukumadda sharciga ee awoodda u leh oo iyaduna oggolaanaysa muddada iyo habka sharcigu tilmaamayo oo haddii aanay sidaas u dhicin ay tallaabooyinka noocani noqonayaan kuwa bura oo aan ansax ahayn.

5)- Xaaalad kasta ee xarig ama xakamayn kale ee xorriyadda shakhsiyadeed, waxaa asbaabaha tallaabadaasi si deg-deg ah oo aan dib u dhac lahayn loogu gudbinayaa laguna gaar siinayaa cidda ay khusayso ee ku shaqa leh.

6)- Qofna uma qoolnaan doono tallaabooyin xagga nabad-gelyada la xiriira marka laga reebo xaaladaha ama kiisaska iyo habka uu sharcigu tilmaamo iyo arrin daba joogta tallaabo ay fulisay xukumadda awoodda u leh oo qeexaysa asbaabta arrintaasi.

7)- Ma jirto qof lagu qaxri karo baaris ama fatishaad shakhsiyeed oo aan ka ahayn xaaladaha iyo Shuruudaha/Qodobada ku degsan farqadaha: 3, 4, iyo xaalado kale oo sharcigu tilmaamay sababo la xiriira sharciga maxkamadda, nadaafadda iyo canshuurta awgood iyo qaabka halkaasi lagu tilmaamay. Xaalad kasta, waa in haddana la ilaaliyaa sharafka qofeed iyo karaamada qofka ay khusayso.

## QODOBKA 18[aad]
## DAMMAANA-QAADKA KU SUGAN XAALADAHA XORNIMO KA QAADISTA SHAKHSIGA

Waxii xad-gudub ah ee jir ahaan ama mooraal (niyad) ahaan loogu gaysto qof laga qaaday xorriyaddiisi shakhsiyadeed waxaa lagu mutaysanayaa ciqaab fal-dambiyadeed.

## QODOBKA 19[aad]
## GACAN-GELIN DAMBIILE IYO MAGAN-GELIN SIYAASADEED.

1)- Ugacan-gelinta dembiile xukumaddi uu dembiga ka galay waxaa lagu kafaala qaadi karaa oo qura xaaladaha iyo habka sharcigu tilmaamayo oo xaaladahaasi oo idil ay khasab tahay in ay la xiriiraan xeer hore oo caalami ah.

2)- Ma jiro qof lagu qahri (qaxri) karo in loo gacan-geliyo xukumaddi uu ka soo cararay dambi siyaasadeed awgeed.

3)- Qof kasta oo laaji ah lagu cadaadiyay waddankiisa dembi siyaasadeed awgiis waxuu xaq u leeyahay in uu magan-gelyo siyaasadeed ku jooga Gobal ka mid ah Dalka sida xaaladaha iyo shuruudaha uu sharcigu u oggolyahay.

## QODOBKA 20aad
## XADKA CANSHUURTA SHAQADA IYO HANTIDA GAAR AHAANEED

Ma jirto canshuur lagu soo rogi karo shaqada iyo hantida gaar ahaaneed ilaa sida waafaqsan sharciga mooyaane.

## QODOBKA 21aad.
## XORIYADDA DEGAAN/HOY

1)- Qof kasta waxuu xaq u yeelanaya in aan gurgiis/hoygiis la jebin Karin.
2)- Laguma dhex samaysan karo baaris, fatishaad ama qabasho xoog ah hoyga ama meel kale oo u khaas ah qofka marka laga reebo xaaladaha iyo shuruudaha ku degsan lambarka 5aad ee Qodobka 17aad iyo xaaldo kale oo sharcigu qeexay sababo sharci maxkameed awgeed oo misane loo raacayo habka u degsan.
3)- Baaritaanada la xiriira caafimaadka, badbaadada iyo canshuurta dadwaynaha lama fulin karo ilaa xaaladaha iyo habka sharciga tilmaamayo mooyaane.

## QODOBKA 22aad.
## XORIYADDA QORAALADA IYO XIRIIKA WARAAQAHA.

1)- Qof kasta waxuu xaq u leeyahay xornimada wax qorista iyo qaab kasta ee xiriirada kale ee isgaarsiineed.

2)- Waxaa xaddidaad iyo xakamayn lagu soo rogi karaa oo qura xaaladaha iyo shuruudaha ku dhigan farqadaha 3,4 iyo 5 ee Qodobka 17aad iyo xaalado kale oo sharcigu qeexo sabab la xiriirta sharci maxkamadeed awgeed sida markaasi halkaas loogu tilmaamay.

## QODOBKA 23aad.
## SINAANTA BULSHO:

Dhamaan dadka waa u simanyihiin xagga sharfka iyo karaamada Bulshada.

## QODOBKA 24aad
## HANTIDA:

1)- Xaqa hanti lahaansha waxaa kafaala qaadaya sharciga oo qeexi doona qaababka lagu kasbado/helo iyo heerarka/xadka ku raaxaysiga sabab lagu xaqiijinayo waxqabadkeeda Bulsho awgeed.

2)- Waxaa hanti lagula wareegi karaa ama lagu Qaramayn karaa oo qura sababa la xiriira dan guud iyo hab sharcigu tilmaamay iyo ku badalasho mag-dhow oo caddaalad iyo si isla waqti ah.

## QODOBKA 25aad.
## XORRIYADDA KULANKA:

1)- Qof kasta waxuu xaq u leeyahay in uu ka qayb qaato/galo kulan ama shir nabadeed si nabad-gelya leh.

2)- Sharciga ayaa diyaarin doona nidaam ku saabsan in xukumadaha laga sii wargaliyo shirarka Dadwaynaha. Waxaa shirarka lagu mamnuuci karaa oo qura sababa la xiriira caafimaadka guud, badbaadada, anshaxa, nidaamka ama nabad-gelyada.

## QODOBKA 26aad.
## XORRIYADDA URURADA

1)- Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u samaysto ururo oggolaansho la'aan.

2)- Qofna laguma khasbi karo in uu galo Urur nooc kasta uu yahaba ama uu ku sii jiro ka mid ahaanshihiisa.

3)- Ururo qarsoodi ah ama kuwa u dhisan qaab debeecadeed Militri waa mamnuuc.

## QODOBKA 27aad.
## XAQA SHAQA JOOJINTA

Xaqa shaqa joojinta waa la oqoonsanyahay, waxaana loo samayn karaa ilaa xadka uu sharcigu tilmaamayo.

## QODOBKA 28aad.
## XORRIYADDA RA'YIGA

1)- Qof kasta waxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u muujiyo una cabbiro ra'yigiisa qaab kasta oo ku xiran xaddiga uu sharcigu tilmaamayo sabab ku saabsan ilaalinta anshaxa iyo nabad galyada guud awgeed.

2)- Muujinta/cabbiridda ra'yiga shardi ma ahan in marka hore fasax oggolaansho la siiyo ama faaf-reeb(jansuurayn)

## QODOBKA 29aad.
## XORRIYADDA DIINTA

Qof kasta waxuu xaq u leeyahay xorriyadda dammiirka iyo in uu si xor ah u sheegto Diintiisa iyo in uu rummeeyo, taasoo ku xiran wixii xaddayn ah ee uu sharcigu tilmaamo oo sababtu tahay ilaalinta anshaxa, caafimaadka guud ama nidaamka. Hase ahaatee, lama oggola in la fidiyo/faafiyo ama borobagaando laga fidiyo Diin kale oo aan ka ahayn Diinta Islaamka.

## QODOBKA 30aad.
## HABK DHAQANKA KHAASKA AH EE QOFKA

1)- Qof kasta waxuu xaq u leeyahay hab dhaqan iyo tilmaan u gaar ah oo uu ku dhex leeyahay Bulshada iyo waddanka oo la xiriira hadba shariciyadiisa ama caadooyinkiisa.

2)- Hab dhaqanka qofeed ee Muslimiinta waxaa xukuma mabaadi'da guud ee shareecadda Islaamka sida dib u habaynta loogu sameeyey sharicga Lr. 16 ee 29 Junyo, 1963.

## CINWAANKA II
## XUQUUQAHA BULSHADEED

### QODOBKA 31aad.
### BADBAADADA QOYSKA

1)- Qoyska oo ku dhisan guur, ahna cunsurka aasaasiga u ah Bulshada, waxaa badbaadinaysa Dawladda.

2)- Waalidiinta ayaa laga rabaa in ay u diyaariyaan siiyaana carruurtooda kaalmo, waxbarasho iyo barbarian sida sharcigu qabo.

3)- Sharicga ayaa diyaarin doona fulinta waajibaadyada lagu tilmaamay farqadda hore ee marka waalidiintu ku timaaddo geeri iyo marka aanay waalidiintu gudan karin waajibaadyadaasi sabab awood darro ama si kale awgeed.

4)- Carruurta waawayn ee qaan–gaarka ah, waxaa ku waajib ah inay kaalmeeyaan waalidiintooda marka aanay iyagu nafsadooda wax is tari karin.

5)- Dawladda ayaa badbaadinaysa/daryeelaysa hooyada iyo dhallaanka, hir-gelinaysana xaruumaha lagama maarmaanka u ah ujeedadaasi.

6)- Waxay Dawladdu u citiraafi doontaa badbaadinta iyo daryeelka carrurta aan waalidiintooda la aqoon in ay tahay waajibaadkeeda.

### QODOBKA 32aad.
### XARUMAHA DARYEELKA

Waxay Dawladdau kobcin doontaa dhiiri–gelin doontaana abuurista xaruumo daryeel ee dadka curyaamiinta ah iyo caruurta aan waalidka lahayn

### QODOBKA 33aad.
### BADBAADINTA CAAFIMAADKA GUUD:

Dawladda ayaa badbaadin doonta caafimaadka guud ee Dadwaynaha, waxayna hirgelin doontaa gargaar caafimaad oo lacag la'aan ah ee dadka saboolka ah.

## QODOBKA 34aad.
## ILAALINTA /DHAWRISTA ANSHAXA GUUD:

Dawladda ayaa ilaalin doonta anshaxa guud si waafaqsan habka sharciga tilmaamayo.

## QODOBKA 35aad.
## WAXBARASHADA

1)- Waxay Dawladda dhiira gelin doontaa waxbarashada oo ah faa'iido aasaasi u ah Bulshada, waxayna diyaarin doontaa samaynta dugsiyo Dawladeed oo u furan dhammaan dadweynaha.
2)- Waxbarashada Dugsiga Hoose/Dhexe ee Dugsiyadda Dawaladda waxay noqonayaan lacag la'aan.
3)- Xorriyadda waxabaridda waxaa dammaana qaadi doona sharciga.
4)- Ururada /Hay'adaha iyo shakhsiyaadka waxay xaq u yeelanayaan in ay dhistaan samaystaana dugsiyo iyo machadyo waxbarasho, si waafaqsan sharciga iyo iyagoon wax kaalmo dhaqaale ah aan ka halayn Dawladda.
5)- Dugsiyada iyo machadyada waxbarashada ee gaarka loo leeyahay waxay yeelan karaan aqoonsi la mid ah tan dugsiyada iyo machadyada Dawladda xagga shuruudaha u degsan ee sharciga.
6)- Barashada Diinta Islaamka waa ku khasab/waajib Ardayda muslimiinta ah ee Dugsiyada Hoose/Dhexe iyo Sare ee Dawladda iyo dugsiyada la heerka aqoonsi leh. Baridda Quraanka Kariimka ah ayaa noqonaysa tiirka aasaasiga ah ee Muslimiinta ee dugsiyada H/dhexe iyo Sare ee Dawladda .
7)- Machadyada waxbarshada sar-sare waxay yeelanayaan Urur madax-bannaan oo ay iska leeyihiin kaasoo ku jira xadka sharcigu tilmaamo.

## QODOBKA 36aad.
## BADBAADINTA SHAQADA

1)- Dawladda ayaa badbaadinaysa shaqada, dhiiri gelinaysana qaababkeeda iyo habka dalabaadkeeda oo dhanba.
2)- Shaqada xoogga iyo khasabka ah ee nooc kastaba, waa mamnuuc.
3)- Xaaladaha ay dhacdo in la amro shaqo militiri ama mid shacab baahi awgeed ama mid daba-joogta/la xiriirta ciqaab xukun waxaa tilmaami doona sharciga.

## ODOBKA 37aad.
## NABAD GELYADA IYO GARGAARKA BULSHADA.

1)- Waxay Dawladdu sare u qaadaysaa nabadgelyada iyo kaalmaynta Bulshada iyadoo loo marayo sharci.

2)- Waxay Dawladdu u dammaana-qaadaysaa shaqaalaheeda Rayid iyo ciidanba/Militeri xuquuqda hawl-gabnimo; waxay sidoo kale u dammaana-qaadaysaa, iyada oo laraacayo sharciga, in ay kaalmo iyo gargaar ka siinayso hadii ay ku dhacaan shil, jiro ama awood darro aanay shaqada ku wadi karin.

## CIWAANKA III
## DAMMAANA-QAADKA SHARCIGA MAXKAMADDA

## QODOBKA 38aad
## XAQA GUDBIN DACWAD SHARCI AH.

Qof kasta waxuu xaq u yeelanayaa in uu u gudbisto dacwad sharci ah, oo leh sharuudo loo wada simanyahay, Maxkamad si sharci ah u dhisan.

## QODOBKA 39aad.
## KA BADBAADINTA SHARCIYADA MAAMULKA DADWEYNAHA

Sharci Maxkamadeed oo ka badbaadiya Maamulaha dadweynaha sharciyada liddiga ku ah ayaa loo oggollaan doona dacwadaha oo dhanba, qaabka iyo saamaynta uu hadba sharciga qeexayo.

## QODOBKA 40aad
## MAS'UULIYADDA DAWLADDA EE FALALKA SARAAKIISHEEDA IYO SHAQAALHEEDA U GAYSTAAN SHACABKA.

1)- Cid kasta oo ay waxyeello ka soo gaadho ficillo ama baabi'in xad-gudub ku ah xuquuqdiisa saraakiisha ama shaqaalaha Dawladda ama kuwa Hay'adaha Dadwaynaha iyagoo gudanaya waajibaadyadooda hawleed, waxay xaq u leeyihiin in ay mag-dhaw ka helaan Dawladda ama Hay'adaha Dadwaynaha ee ay khuseeyaan.

2)- Ciqaabta madaniga iyo mas'uuliyadda maamul ee saraakiisha iyo shaqaalaha ee falalka ama baabi'inta ee faqradda kore lagu soo xusay waxaa xukumaya sharciga.

## QODOBKA 41aad
## XUQUUQDA DIFAACA

1)- Xuquuqda Difaaca waxaa loo ogalaan doonaa marxalad kasta oo tallaabo ama nidaam sharci ah.

2)- Dawladda ayaa dammaana-qaadi doonta, si waafaqsan shurudaha iyo hannaanka uu sharcigu dhigayo, in dadka masaakiinta ah la siiyo gargaar sharci ah oo bilaasha/lacag la'aan ah.

## QODOBKA 42aad
## NOOCA CIQAABTA SHARCI EE AAN DIB U DHGIS LAHAYN.

Ma jiro qof loo ciqaabi karo ama loo xukumi karo fal aan ciqaab dambiyeedkiisu ku jirin sharciga lagu shaqeeyo ama dhaqan-galka ah waqtiga la galay ama uu dhacy; sidoo kale, ciqaab ka culus tan markaas u dhiganta in lagu fuliyo looguma qaadi karo si khasab ah.

## QODOBKA 43aad
## MAS'UULIYADDA CIQAABTA.

1)- Mas'uuliyadda ciqaabta waxay noqonaysaa mid shakhsi (khaas) ah. Nooc kasta ee ciqaab wadareed waa la mamnuucayaa.

2)- Eedaysanaha (dacwaysanaha) waxaa loo qaadanayaa inuusan danbiile ahayn ilaa xukun kama dambays ah uu ku dhaco ama lagu rido.

## QODOBKA 44aad
## UJEEDADA BULSHADEED EE CIQAABTA.

Ciqaabaha lagu xanibayo xorriyadda shakhsiga ma noqonayso hab dhaqan liddi ku ah damiirka Bina-aadamnimo ama mid loola jeedo in lagu wax-yeelleeyo anshaxa suubban ee qofka la xukumay.

## QODOBKA 45aad
## AWOOD SAARIDDA CIQAABTA

Kormeeridda awood saaridda ciqaabta iyo tallaabooyinka ammaanka waxaa fulinaya maxkamadda awoodda u leh si waafaqsan sharciga.

## QODOBKA 46aad
## DIB U SIXID KHALADAAD SHARCIYEED:

Shuruudaha iyo nidaamka sixitaanka khaldaadyada sharciyeed waxaa qeexi doona sharciga.

## CINWAANKA IV
## WAAJIBAADYADA XAGGA DAWLADDA/ QARANKA.

## QODOBKA 47aad
## WAAJIBAADKA ILAALINTA DASTUURKA IYO SHARCIYADA:

Qof kassta waa in uu si daacadnimo leh u ilaaliyaa Dastuurka iyo sharciyada Dalka/Dawladda.

## QODOBKA 48aad
## WAAJIBKA BIXINTA CANSHUURAHA:

1)- Qof kasta waa in uu ku tabarucaa kharashka guud ee Dawladda hadba inta awooddiisa tahay ee uu bixin karo.
2)- Nidaam canshuureed ku salaysan mabaadi'da caddaaladda Bulshada waxaa loo dejin doonaa sharci u gaar ah.

# QAYBTA IV
# DHISMAHA HAYKALKA DAWLADDA.

## CINWAANKA I.
## GOLAHA SHACABKA (BAARLAMAANKA).

## FARACA I.
## HAY'ADAHA GOLAHA SHACABKA:

## QODOBKA 49aad
## AWOODDA SHARCI DEJINTA:

Awoodda sharci dejinta waxaa xaq u leh Golaha shacabka/Baarlamaanka.

## QODOBKA 50aad
## CAQIIDADA ISLAAMKA EE XAGGA SHARCIGA:

Caqiidada Islaamka ayaa noqon doonta ilaha aasaasiga ah ee ugu muhiimsan ee sharciyada Qaranka/Dawladda.

## QODOBKA 51aad
## GOLAHA SHACABKA

1)- Golaha shacabka waxuu ka koobnaan doonaa wakiillo ama Dibutaatiyaal ay dadku soo dooortaan si guud oo xor, toos iyo coddayn qarsoodi ah, weliba wakiillo ama Dibutaatiyaal ah sida saxa ah.

2)- Tirada wakiillada ama Dibutaatiyaasha iyo nidaamka doorshada waxaa dejin doona sharciga.

3)- Muwaadin kasta oo xaq u leh in uu codeeyo sannadka doorashooyinkana ay ugu buuxsantay ugu yaraan 25 sano jir, waxuu xaq u yeelanyaa in uu noqdo wakiill ama Dibutaati. Sharciga ayaa faah-faahin ama qeexi doonaa shuruudaha aan lagu mutaysan karin looguna tartami karin xubinimada Golaha shacabka/Baarlamaanka.

4)- Qofkii ka soo noqday Madaxwayne Jamhuuriyadda waxuu noqonayaa Dibutaati ama xildhibaan waligii inta noloshiisa si xuquuq ah, oo ka dheeri ah xildhibaanada la soo doortay, haddii uusan horay ugu dhicin xukun maxkamadeed oo la xiriira mid ama qaar ka mid ah dembiyada lagu tilmaamay farqada 1ad ee Qodobka 76ad

## QODOBKA 52aad
## MUDDADA XILKA IYO DOORASHOOYINKA

1)- Gole sharci dejin kasta waxaa la dooranayaa muddo shan sano ah, laga billaabo marka shaaca laga qaado laguna dhawaaqo natiijooyinka doorashada. Dib u habayn ama wax ka beddelid kasta oo lagu sameeyo muddadatan xilka xafiiska saamayn kuma yeelan doonto muddada Golaha sharci dejinta (Baarlamaanka) ee jira waqtiga go'aanka noocani la qaadanaya.

2)- Taariikhda doorashooyinka Golaha cusub waxaa cayimaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda, waxuuna dhacayaa xilliga soddonka maalmood ee ugu dambeeya ee kalfadhiga Golaha dhexdiisa.

3)- Golaha cusub waxay kulamayaan, marka ugu horraysa, soddon maalmood gudahood marka lagu dhawaaqo natiijooyinka doorashada.

## QODOBKA 53^aad
## KALA DIRID GOLAHA SHACBKA

1)- Isagoo dhegaysanaya tixgelinayana ra'yiga Guddomiyaha Baaralmaanka, Madaxwaynaha Jamhuuriyadda waa uu kala diri karaa Golaha ka hor inta aysan dhammaan muddadiisa xilka xafiiska, marka ay dhacdo in uu Goluhu gudan waayo waajibaadkiisa shaqo ama uu u fuliyo qaab halis gelin kara nidaamka caadiga ah ee wadidda hawlaha sharci dejinta.

2)- Isla dekereetada kala dirista Golaha, waxuu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ku cayimayaa taarikhda la qabanayo doorashada cusub, waxayna doorashadu dhacaysaa lixdan maalmood gudahood marka la kala diro Golaha.

3)- Ma dhici doonto kala dirid muddada sannadka ugu horreeysa ee uu Goluhu xilka xafiiska qabto, ama sannadka ugu dambeeya ee xilka xafiiska ee Madaxwaynaha Jamhuuriyadda.

4)- Golaha Baarlamaanka ee waqtigoodi u dhammaaday waa ay sii haynayaan awooddooda xaaladahaasi oo dhanba ilaa lagaga dhawaaqo natiijooyinka doorashada ee Golaha cusub.

## QODOBKA 54^aad
## KALFADHIYADA GOLAHA BAARLAMAANKA

1)- Goluhu waxuu yeelanayaa laba kafadhi sannadkiiba oo midkiiba uu furmayo Bilaha Abriil iyo Oktobar.

2)- Golaha waxaa isugu yeeri kara kulan aan caadi ahayn Guddomiyaha, ama codsiga Madaxwaynaha Jamhuuridda, ama xukuumadda, ama afar meelood meel xubnaha xildhibaaanada Baaralmaanka.

## QODOBKA 55^aad
## NIDAAM

1)- Shirkiisa ugu horaya, Golaha Baarlamaanku waxuu iska dhex dooranayaa Guddoomiye, hal ama in ka badan Guddomiye ku–xegeeno iyo xubnaha kale ee xafiiska Guddomiyaha.

2)- Sharciga iyo nidaamka kala-dambaynta ee Golaha dhexdiisa waxaa ilaalinaya Golaha qudhiisa iyadoo loo sii marayo Guddomiyaha ama ciddii markaasi metelaysa booskiisa sida waafaqsan qaanuunada habka hawl fulineed.

3)- Shirarka Golaha waxay noqonayaan kuwa u furan dadwaynaha. Xaalado khaas ah oo qura ayuu Goluhu go'aansan karaa in uu yeesho kulan albaabda u xiranyihiin oo ku xiran talo soo jeedinta Guddomiyaha Golaha, ama codsiga Madaxwaynaha Jamhuuriyadda,ama xukuumadda, ama ugu yaraan 30 (soddon) xildhibaan/Dibutaati.

4)- Go'aanka Golaha ma noqonayo ansax ilaa in ay tirada ugu badan oo saxa ah ee xildhibaanada ay joogaan mooye iyadoo aan la tirinayn ama la xisaabayn jagooyinka bannaan.

5)- Dhammaan go'aamada waxaa lagu qaadanayaa codka inta badan ee xubnaha jooga, waxaan ka ahayn mark uu Dastuurka ama sharciga u baahdo ama laga doonayo tiro aqlabiyad oo khaas ah/cayiman.

6)- Dib looma keeni karo soo jeedin uu Goluhu qaadacay ilaa lix bilood ay ka soo gudubto kadib marka la qaadacay

## QODOBKA 56aa
## KA SOO QAYBGALKA WASIIRADA IYO WASIIR KU–XIGEENADA DAWLADDA

1)- Wasiirada iyo wasiir-ku-xigeenada waxay xaq u leeyihiin in ay ka soo qayb-galaan shirarka Golaha shacabka iyo kuwa Guddiyada iyo in ay qayb ka qaataan wada hadallada ama doodda Golaha. Codsiga wasiirada kadib waxaa iyana shirarka noocani uga qaybgeli kara Saraakiisha iyo khabiirada oo ra'yigooda dhiiban kara lana dhagaysanayaa.

2)- Wasiirada iyo wasiiro ku-xigeenada waa ay joogi karaan shirarka haddii uu Golaha shacabku ka codsado.

## QODOBKA 57aad
## QAWAANIINTA HABKA HAWL-FULINTA

Haddii aysan ahayn in si kale oo uu Dastuurku u dhigay, fulinta (ama hogaaminta) hawsha Golaha waxaa xukumaya nidaama qaynuuni ah oo ay ansixiyeen Golaha oo la xiriira soo jeedinta Guddoomiyaha ama ugu yaraan Shan xildhibaan.

## QODOBKA 58^ad^
## XILDHIBAANADA/DIBUTAATIYAASHA

1) Xildhibaan kasta waxuu wakiil ka yahay dadka wuxuuna shaqooyinkiisa u gudanayaa iyadoo aysan jirin wax waajib ah oo xiraya ama xanibaya.
2) Marka uu qaado xilka shaqadiisa, Xildhibaan kasta waxuu marayaa dhaarta soo socota ee daacad u noqoshada Qaranka Golaha hortooda:- **"WAXAAN KU DHAARANAYAA MAGACA ILAAHAY IN AAN SI DAACADNIMO AH U FULIN DOONO DHAMMAAN WAAJIBAADYA-DEYDA HAWLEED SI AY KU JIRTO DANTA DADKA IYO IN AAN U HOGGAANSAMI DOONO DASTUURKA IYO SHARCIYADA (DALKA)."**
3) Xildhibaanada dembi laguma soo oogi karo sabab la xiriirta xaqiiqa la sheegay, ra'yi la dhiibtay ama codad ay u dhiibteen iyagoo gudanaya shaqooyinkooda awgood.
4) Oggolaanshaha ama amarka Golaha la'aantiisa, ma jiro dambi lagu qaadi doono Dibutaati/xildhibaan, mana la xiri karo ama lagama qaadi karo xorriyaddiisa shaqsiyaded, ama baris laguma samayn karo isaga qof ahaan ama hoygiisa, marka laga reeebo xaalad cad oo uu dembi faraha kula jiro oo markaasna ay waajib tahay in la helo warqad waaran ah ama amar lagu xirayo, ama lama xabisi karo meelna laguma hayn karo iyadoo xukun lagu fuliyay mooyaane, xitaa haddii ay noqoto mid kama dambays ah.
5) Xaaladaha kale ee aanay khusayn kuwa dambi ku soo oogidda, tallaabo waa laga qaadi karaa xildhibaan si waafaqsan sharci oggolaansho la'aantan Golaha.
6) Xildhimaanda haya xilka xafiis waxay xaq u yeelanayaan ujuuro iyo gunno fadhi-maalmeed oo uu sharci goynayo ama jaangooynayo.

## QODOBKA 59^aad^
## GO'AAMADA ANSAX AHAANSHAHA SHURUUDAHA XILDHIBAANADA/DIBUTAATIYADA

1)- Maxkamadda sare ayaa lahaan doonta awoodda xukun ee dacwad la isku hortaagayo shuruudaha xildhibaanda (ku soo galeen).
2)- Iyadoo la qeexayo sababaha waxaa dacwadaha caynkaasi soo gudbin karaa muwaadin kasta oo codbixiye ah, mudo sodon barri gudohood ah marka lagu dhawaaqo shaacana laga qaado natiijooyink doorashooyinka ama ay dhacdo sabab khilaaf ama habboonaan daro.

3)- Maxkamadda sare waxay go'aan ku dhiibaysaa sagaashan maalmood gudoohood laga billaabo maalinta ay ku egtahay waqtiga loo xaddiday ee loo dejiyay in dacwadda lagu soo gudbiyo.

4)- Halka uu mudane xildhibaan ka joojiyo ama ka gudan waayo shaqadiisa, Golaha ayaa ku dhawaaqaya shaacana ka qaadaya in kursigiisi bannaayahay, waxaana loo fayl-garandoonaa habka sharcigu tilmaamo.

## FARACA II.
## DIYAARINTA SHARCIGA IYO SHAQOOYINKA KALE EE GOLAHA SHACBKA:

### QODOBKA 60aad
### SOOBANDHIGIDDA IYO KADDOODIDA SHARCIYO AAN RASMI AHAYN OO LA SOO DIYAARIYAY.

1)- Xildhibaan kasta, xukuumadda ama ugu yaraan 10,000 oo codeeyayaal ah ayaa xaq u leh in ay u soo gudbiyaan qoraalka sharciyada aan rasmiga ahayn Golaha Baarlamaanka Qaranka.

2)- Isticmaalka awoodda ee go'aanka ama tallaabada caanka ah waxaa xukumaya sharciga, lamana xiriiri doonto arrimaha canshuurta.

3)- Ka hor intaanu ka munaaqashoon ama ka doodin Golaha Qoraalka sharci ee noocani waxaa darsi doona hubina ku samayn doona Guddi Baarlamaani ah oo ugu soo gudbin doona Golaha hal ama in ka badan oo warbixino sidaasi.

4)- Golaha ayaa ka munaaqashoon doona Qoraal kasta ee sharci iyadoo laga shidaal qaadanaya qaanuunada nidaamka hawl-fulineed, waxay u codayn doonaan Qodob-Qodob, ugu dambayntiina waxay u codayn doonaan qoraal-sharciyeed oo dhan.

### QODOBKA 61aad
### DHAQAN-GELIN IYO DAABACAAD

1)- Sharci kasta oo uu Goluhu ansixiyo waxaa dhaqan-gelinaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah marka la ansixiyo.

2)- Haddii uu Goluhu si aqlabiyad buuxda ah ee xubunihiisa, ugu dhawaaqo in ay jirto baahi deg-deg ah, waxaa sharcigaas lagu dhaqan-gelinayaa waqti xaddidan gudihiis oo uu Gohuhu cayimayo, waxaase shardi ah in xaddidaadda waqtiga ee noocani aysan ka yaraan shan maalmood.

3)- Muddada loo cayimay dhaqan-gelinta gudaheeda, waxuu Madaxwaynaha Jamhuriyadda u soo gudbin karaa Golaha farriin uu ku codsanayo, isagoo sheegaya sababaha taasi keentay, in sharciga dib loo eego.

4)- Haddii uu Goluhu ku ansixiyo sharciga noocani mar kale aqlabiyad dhan seddex meelood laba meel ($^2/_3$), waxuu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ku dhaqan-gelinayaa soddon maalmood gudahood marka la ansixo.

5)- Sharci kasta oo uu Golaha ansixiyo, Hoggaamiyaha Qarankuna dhaqan-geliyo, waxaa lagu daabacayaa wargayska Rasmiga ah ee Dawladda, waxuuna hawl-gal nogonayaa maalinta 15[aad] ee daabacaadiisa haddii uusan sharcigu si kale u dhigin.

## QODOBKA 62[aad]
## WAKIILASHADO AWOOD SHARCI DEJINEED:

1)- Goluhu waxay wakiil ugu noqon karaan Dawladda Awoodda in ay soo saaraan Qodobo ama shuruudo ku saabsan mowduucyo ama arrimo muddo xaddidana leh, oo leh awood sharci. Marka uu ka wakiil noqonayo xukumadda Goluhu waxuu dejin karaa siyaasadda iyo tilmaamaha mawduuca.

2)- Qodobada lagu sameeyay awood wakiilasho waxaa lagu soo saarayaa dekreetada Madaxwaynaha Jamhuuriyadda kadib soo jeedinta Golaha Wasiirada.

## QODOBKA 63[aad:]
## DEKEREETAYNTA SHARCIYADA:

1)- Marka ay jirto baahi deg-deg ah, Dawladdda/xukumadda waxay soo saari kartaa Qodobo ku meel gaar ah oo leh awood sharci.

2)- Qodobada noocani waxaa lagu soo saarayaa Dekereetada Madaxwaynaha Jamhuuriyadda iyadoo la raacayo codsiga Golaha Wasiirada, waxaana shan maalmood gudahood laga billaabo taarikhda daabacaaddooda loo gudbinayaa Golaha Baarlamaanka si ay ugu beddelaan sharci.

3)- Haddii ay ku jiraan kalfadhi, Goluhu waxay ku go'aaminayaan sharci u bedeliddooda muddo 30 maalmooda gudahood laga bilaabo taarikhda loo gudbiyay; haddii aysan ku jirin kalfadhi, waxuu ku go'aaminayaa muddo 30 maalmood gudahood ah ee shirkiisa xiga ee ugu horreeya.

4)- Qodobada aan loo beddelin sharci waa baaba'ayaan awoooddooda sharci ahaaneed ee wax qabad (**ob initio**). Hasa ahaate, waxuu Goluhu go'aamin karaa in dhammaanshaha ama baabi'idda awoodda sharciyada noocani ay dhici karaan taarikh kala duwan, waxuuna nidaamin karaa natiijooyinka/ahmiyadaha sharcigan ka dhasha Qodobada noocani ee aan sharci loo beddelin.

## QODOBKA 64$^{aad}$
## CAFIS GUUD IYO SIIDAYN:

1)- Awoodda bixinta cafis guud iyo siidayn waxaa loogu wakiilan karaa Madaxwaynaha Jamjuuriyadda sharci uu ansixiyay Golaha Baaralamaanka oo ku najaxay aqlabiyad dhan seddax meelood laba meel ($^2/_3$) xubnaha xildhibaanada.

2)- Cafis guud iyo siidayn laguma bixin karo dembiyo la galay kadib markii la gudbiyay qoraalka sharciga aan rasmiga ahayn ee ergaynta awoodaha.

## QODOBKA 65$^{aad}$
## CANSHUUR IYO KHARASH.

1)- Dulsaarid, dib u habayn iyo mamnuucidda canshuuraha waxaa samayn kara oo qura sharci.

2)- Sharciyada ku lug leh kharashaadka cususb ama ka sii badan ee Dawladda waa in ay caddeeyaan qaababka lagu heli karo ama dabooli karo kharashayada noocani.

3)- Haddii ay dhacdo xaalad uu kharash socon karo in kabadan hal sano, qaabka lagu dabooli karo waxaa lagu xaddidayaa miisaaniyadda sannadkaasi.

## QODOBKA 66aad
## MIISAANIYADA IYO XISAABAAD-SANNADEEDKA

1)- Golaha Baarlamaanka ayaa sannad kasta ansixin doona qiyaasta miisaaniyadda oo ay soo gudbin doonto Dowladda/xukumadda ugu yaraan laba bilood ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka.
2)- Sharciga ansixinta misaaniyadda ma dejin doonao canshuuro kordhin cusub iyo kharashaad cusub.
3)- Dalab codsi ee ku meel gaar ah ee miisaaniyad waxaa oggolaan kara sharci muddooyin aan wadar ahaan ka badnayn seddax bilood.
4)- Lixda bilood ee ugu horreeya gudahooda ee sannad misaaniyadeed kasta, waxay Dawladda/Xukumadda ugu gudbinaysaa Golaha Baarlamaanka, si uu u ansixiyo xisaabaadka sannadle ee la xiriira sannad miisaaniyadeedkii hore.

## QODOBKA 67aad
## HESHIIYADA CAALAMIGA.

Waxuu Goluhu ku oggolannayaa sharci aqbalaadda iyo ansixinta heshiisyada caalamiga ee dhinacyada siyaasadda, Militeriga iyo Ganacsiga, ama heshiisayada khuseeya dib u habaynta sharciga ama ballan-qaadyada lacageed ee aan lagu darin miisaaniyadda.

## QODOBKA 68aad
## XAALAD DAGAAL

Golaha Baaralmaanka ayaa oggolaanaya ama amraya shaac-ka-qaadista iyo ku dhawaaqidda xaalad dagaal iyadoo kala tashanaysa Dawladda/Xukumadda awoodaha lagama maarmaanka ah.

## QODOBKA 69aad
## AWOODDA WAX BARISTA EE GOLAHA SHACABKA

1)- Xildhibaan kasta waxuu xaq u leeyahay in uu jeediyo su'aal ama uu u gudbiyo arin caalami ah Dawladda/Xukuumadda iyo in uu u soo jeediyo Golaha mowduuc. Dawladda/xukumadda waxay uga soo jawaabaysaa 20 maalmood gudahood.

2)- Baarlamaanka waxuu amri karaa baaritaano ay fulinayaan Guddiyo ka kooban xildhibaano ka kala socda dhammaan kooxaha Baarlamaaniga ah, si loo soo baaro dhacdooyin ama xaalado khuseeya danta guud. Marka uu go'aansado in uu amro baaris noocani, Goluhu waxuu dejinayaa awoodaha Guddiyada oo aan ka baxsanayn xuduudaha Dastuurka; waxuu kaloo magacaabi karaa khabiiro la shaqeeya guddiyada.

## CINWAANKA II
## MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADDA

### QODOBKA 70aad
### DOORASHO

1)- Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa noqonaya madaxa Dawladda wakiilna ka ah cutubka Qaranka.

2)- Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa si cod–bixin qarsoodi ah ku dooranaya Golaha Baarlamaanka oo ah in uu helo aqlabiyad dhan seddax meelood laba meel ($^{2}/_{3}$) codadka xildhibaanda wareegga kowaad iyo kan labaad ama aqlabiyad buuxda ee Golaha, cod-bixinada xiga.

3)- Marka uu qaado xilkiisa hawleed, Madaxwaynaha Jamhuuriyadda waxuu Golaha Baarlamaanka hortiisa ku marayaa dhaarta socota ee daacad u noqoshada Dawladda/Qaranka:- "**waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay in aan si daacadnimo ah u gudan doona dhammaan waajibaadyadayda shaqo ee Madaxwaynanimada Jamhuuriyadda iyo in aan u difaaci doono Dastuurka ilaa inta karaankayga oo ay ku jirto danta Dalka iyo Qaranka**".

### QODOBKA 71aad
### SHURUUDAHA MUDNAANSHAHA.

1)- Muwaadin kasta oo Muslim ah, Aabihii iyo Hooyadiina ay labaduba yihiin muwaadiniin asal ah oo xaq u leh in uu cod dhiibto/bixiyo, da'diiso aysan ka yareen afartan iyo shan jir, waxuu mudnaan u yeelanayaa in uu noqdo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda. Qof lama dooran karo in kabadan laba xilli doorasho oo isku xiga.

2)- Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ma qabi karo, mana guursan karo haweenay aan asal ahaan muwaadin Soomaali ahayn muddada uu xilka xafiiska hayo.

3)- Muddada uu xilka xafiiska hayo, Madaxwaynaha Jamhuuriyadda kama qayb geli karo shaqa kale ee guud ama dadwayne oo aan ka ahayn xaqa in uu wax doorto, kamana qayb qaadan karo wax meherad xirfadeed oo shaqo, ganacsi, hawl warshadeed ama dhaqaale ah.

## QODOBKA72aad
## MUDDADA XILKA XAFIISKA.

1)- Muddada xilka xafiiska ee Madaxwaynaha Jamhuuriyadda waxay noqonaysaa lix sano laga billaabo taarikhda la dhaariyo. Wixii isbeddel ama dib u hebayn ah ee lagu sameeyo muddadatan ma saamayn dooto Madaxwaynaha markaas xilka haya.

2)- Guddomiyaha Golaha Baarlamaanka ayaa cayimaya taarikhada doorashada Madaxwaynaha cusub ee Jamhuuriyadda. Doorashada waxay dhacaysaa 30 maalmood gudahood int ayasan dhammaan muddada xilka xafiiska ee Madaxwaynaha Jamhuuriyadda.

3)- Marka ay dhacdo in Golaha Baarlamaanka la kala diro ama ay muddadiisa xafiiska ku ektahay in seddax bilood gudahood ka yar, doorashada Madaxwaynaha waxay dhacaysaa 30 maalmood gudahood oo ka billaabmaysa kulanka ugu horreeya ee Golaha cusub. Inta muddadaasi, Madaxwaynaha xafiiska haya ayaa sii wadaya awoodda xukun.

## QODOBKA73aad
## MUSHAAROOYINKA IYO DADKA SHAQAALAHA EE MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADDA

Mushaarooyinka iyo gunnooyinka Madaxwaynaha Jamhuriyadda iyo caddadka loo baahanyahay ee dajintiisa (shaqaale, qalab, iwn) waxaa qeexi doona sharci.

## QODOBKA 74aad
## AWOOD DARRO, IS CASILAAD, GEERI

1)- Haddii ay ku timmaaddo xaalad geeri, is casilaad, ama awood la'aan joogta ah Madaxwaynaha Jamhuriyadda, Golaha Baarlamaanka ayaa ku kulmiyo muddo 30 beri gudahood ah oo ay ku dooranayaan Madaxwayne cusub ee Jamhuriyadda.

2)- Ilaa doorashada lagu soo xusay farqadda kore ay ka dhacayso iyo xaaladaha marka awoodaha xukun ee Madaxwaynaha xilka xafiiska haya lagu laalay sida ku cad Qodobka 76aad iyo sidoo kale dhammaan xaaladaha awood darro ee KMG, waxaa hawlaha shaqo ee Madaxwaynaha Jamhuriyadda si ku-meel-gaar ah u sii fulinaya si awood buuxda leh Guddomiyaha Baarlamaanka ama haddii uu maqan yahay **Guddomiye ku-xigeenka** ugu isiyaanaysan.

3)- Marka xaaladda Iscasilaada, Madaxwaynaha Jamhuriyadda waxuu ogaysiis qoraal ah oo arritaasi ku saabasan siinayaa Golaha Baarlamaanka.

## QODOBKA 75aad
## AWOODAHA IYO WAAJIBAADYADA:

Madaxwaynaha Jamhuriyadda waxuu fulinayaa hawlaha ay farayaan Dastuurka iyo sharci ee xagga dhinacyada sharci dejinta, fulinta iyo xeer ilaalinta. Sidoo kale, waxuu:-

i. Amri ama oggolaan karaa in Golaha Baarlamaanka loo gudbiyo qoraal sharci oo aan rasmi ahayn kana soo baxay Dawladda/Xukumadda.
ii. U jeedinayaa Golaha Baarlamaanka farriimo.
iii. Bixinayaa cafis khafiifinayaana xukun.
iv. Magacaabayaa qaabilayaana wakiillo Diblomaasiyadeed (safiiro, iwn).
v. Ansixinayaa heshiisyo caalami ah oo uu Golaha Baarlamaanka horay u soo oggolaaday meeshi hadbo looga baahdo.
vi. Noqonayaa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka sida.
vii. Ku dhawaaqayaa xaalad dagaal kadib markuu soo oggolaado Golaha Baarlamaanka iyadoo la raacaayo Qodobka 68aad.
viii. ______________________________

## QODOBKA 76aad
## MAS'UULIYAD

1)- Madaxwaynaha Jamhuuriyadda mas'uul kama noqon doono falal lagu sameeyay iyadoo la fulinayo hawlahiisa, marka laga reebo khiyaamo Qoran oo waawayn ama isku dayo ka soo horjeedo nidaamka Dastuurka, sida uu sharci diyaariyay.

2)- Mas'uuliyadda la xirriirta xagga sharciyada Madaxwaynaha waxaa inta kale iska leh Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiirada awoodda u leh ee iyagu qaabilsan/ayidsan.

3)- Xaaladda ku saabasan khiyaamo Qaran oo wayn ama tallaabooyin isku day ah oo ka soo horjeeda nidaamka Dastuurka, waxaa Madaxwaynaha Jamhuriyadda dacwad loogu soo oogi karaa go'aan uu Golaha Baarlamaan ka qaatay mowduuca ay soo jeediyeen ugu yaraan shan meelood hal meel ($^1/_5$) xubnaha Golaha laguna ansaxiyo cod-bixin qarsoodi ah oo leh aqlabiyad dhan seddax meelood laba meel ($^2/_3$) ee xildhibaanada; waxaa lagu qaadayaa maxkamadda sare oo u samaysan sida maxkamadda ugu saraysa ee caddaaladda.

4)- Xaaladaha ku xusan farqadda sare mooyaane, Madaxwanaha Jamhuriyadda lalguma qaadi karo maxkamad iyo wax ciqaab dembi ah marka laga reebo marka uu Goluhu bixiyo oggolaashihiisa, laguna ansixiyo cod-bixin qarsoodi ah ee aqlabiyad dhan seddax meelood lab meel ($^2/_3$) xubnaha xildhibanada.

5)- Ansixinta dacwad ku oogid ee khiyaamo Qaran oo wayn ama tallaabo isku day oo liddi ku ah nidaamka Dastuurka ama oggolanaasho in la bilaabo tallaabo sharci ka qaadid ee dembi kuna saabsan debmi kale ee kasta waxay u baahanayaan in si deg-deg ah loo laalo awoodaha Madaxwaynaha.

## CIWAANKA III
## DAWLADDA/XUKUMADDA

## FARACA I

## QAAB DHISMEEDKA HAYKALKA DAWLADDA/XUKUMADDA:

## QODOBKA 77aad
## AWOODDA FULINTA

Awoodda fulinta waxaa xaq u leh Dawladda/xukumadda.

## QODOBKA 78aad
## DAWLADDA/XUKUMADDA.

1)- Dawladda/xukumadd waxay ka koobnaanaysaa Ra'iisul Wasaare iyo Wasiirada.

2)- Kulanka Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiirada ayaa noqonaya ama ay ka abuurmaysaa Golaha Wasiirada.

3)- Ra'iisul Wasaarha waxaa magacaabaya xilkana ka qaadaya Madaxwanaha Jamhuriyadda.

4)- Wasiirada waxaa magacacbaya xilkana ka qaadaya Madaxwaynaha Jamhuriyadda isagoo tixgelinaya talo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha.

5)- Inta aanay la wareegin hawlahooda shaqo, Ra'iisul Wasaaraha iyo wasiirada waxay Madaxwaynaha Jamhuriyadda hortiisa ku marayaan dhaaarta soo socota ee daacad u ahaanasha Dawladda/Qaranka:- "**waxaan ku dhaaranayaa magaca Eebbe in aan si daacad ah u gudan doona waajibaadyada hawleed oo ay ku jirto danta dadka una hoggaansami doono Dastuurka iyo sharciyada Dalka.**"

## QODOBKA 79aad
## WASIIR KU-XIGEENADA DAWLADDA:

1)- Wasiiradu waxay yeelan doonaan wasiir ku-xigeenada Dawladda oo uu soo magacaabayo xilkana ka qaadayo Madaxwaynaha Jamhuriyadda oo qadderinaya talo soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha ka dib markii uu dhegaysto Golaha Wasiirada.

2)- Wasiir ku-xigeenada waxay caawinayaan Wasiirada waxayna fulinayaan shaqooyinka loo wakiisho ama hadba loo xilsaaro.

3)- Intaysan la wareegin hawlahooda shaqo, wasiir ku-xigeenada waxay Ra'iisul wasaaraha hortiisa ku marayaan dhaarta soo socota ee daacad u ahaanashaha Dawladda, "**waxaan ku dhaaranayaa magaca Eebbe in aan u gudan doono waajibaadyadayda hawleed si daacadnimo leh oo ay ku jirto danta dadka, iyo in aan u hoggaansami doona Dastuurka iyo sharciyada Dalka.**"

## QODOBKA 80aad

## SHURUUDAHA U QALMIDDA EE MAGACAABISTA WASIIRADA IYO WASIIRO KU-XIGEENADA:

1)- Muwaadin kasta oo leh shuruudaha u qalmidda ee looga baahanyahay in loo doorto Dibutaati waa loo magacaabi karaa Wasiir ama Wasiir ku-xigeen.

2)- Muddada uu hayo xilka xafiiska, Wasiir ama Wasiir ku-xigeen ma gali karo mana fulin karo shaqooyinka kale ee guud ama Dawladeed, marka laga reebo in uu guto xaqa in uu wax doorto iyo shaqooyinkiisa Xildhibaanimo ee Golaha Baaarlamaanka dhexdiisa, sidoo kale ma geli karo hawlaha la xiriira xagga mehered xirfadeed: ganacsi, warshad ama dhaqaale. Ma qadan karo, si toos ah ama si dadban toona kirada ama iibsashada hanti ay leedahay Dawladda ama ay leeyihiin Hay'ado dadwayne, marka laga reebo goob dhismo oo uu isaga u isticmaalo degaan. Intaa ka sokow kama gadi karo kamana kirayn karo hantda uu isaga qudhiisa leeyahay Dawladda ama Hay'ado dadwayne ugumana qayb geli karo, awood shakhsi ahaaned, shirkad Dawladeed ama shirkad Dawladu xukunto.

## QODOBKA 81aad
## KOOBNAATA GOLAHA WASIIRADA IYO WASAARADAHA

1)- Shaqooyinka Madaxtinimada ee Golaha Wasiirada iyo sidoo kale tirada iyo hawlaha wasaaradaha waxaa lagu dejin doonaa sharci (gaar ah).

2)- Nidaamka madaxtinimo ee Golaha Wasiirada, Wasaaradaha iyo xafiisyada hoos imanayo waxaa lagu dejin doonaa xeer- nidaamiye lagu soo saari doonaa dekereetada Madaxwaynaha Jamhuriyadda.

## QODOBKA 82aad
## CODKA KALSOONIDA EE GOLAHA BAARLAMAANKA:

1)- Waxay Dawladda/xukuumadda ku helaysaa codka kalsoonida ee Golaha Baarlamaanka 30 maalmood gudahood marka la soo dhiso. Xukumadda iyada ayaa is hor keenaysaa/gaynaysaa Golaha Baarlamaanka kana codsanaysaa codkiisa kalsoonidaa. Waxay xukuumaddu waydiisan kartaa Golaha in uu u muujiyo codkiisa kalsooni waqti kasta sitaasi xigta.

2)- Golaha Baarlamaanka waxay ku muujinayaan codkooda kalsoonida ama diidmada hab mowduuc soo jeedin ah oo la soo hordhigo iyadoo la qeexay sababaha keenay taasi kuna ansaxmayo aqlabiyad hal dheeri ah oo qura kuna dhacaya doorasho furan.

3)- Mowduuca noocani oo la qaadacay ama loo diiday codki kalsoonida waa la soo jeedin karaa mar kale, iyadoo la tilmaamayo sababaha keenay, oo ay soo bandhigayaan ugu yaraan toban xildhibaan, waxaana dib u eegis loogu samayn kaaraa in aan ka yarayn shan cisho kadib marki la soo bandhigay. Si loo sii wado, waxay u baahanaysaa in la helo aqlabiyad buuxda oo cod-bixin furan ah.

4)- Hadduu Goluhu cod kalsooni diidmo ah bixiyo dhammaan xubnaha Dawladda/Xukuumadda waa is casilaysaa.

5)- Xukumadda is-casishay waxay sii haynaysaa hawsha xafiiska taasoo ujeedadu tahay in ay sii waddo waajibaadyada hawleed ee joogtada ah ilaa laga soo magacaabo xukumadda cusub.

## FARACA II.
## HAWLAHA XUKUUMADDA IYO QAYBAHA HOOS YIMAADA:

## QODOBKA 83aad
## AWOODAHA IYO MAS'UULIYADDA RA'ISUL WASAARAHA IYO WASIIRADA.

1)- Ra'iisul Wasaaraha ayaa hagaya siyaasadda guud ee Dawladda sidaas darteedna mas'uul ka ah. Waxuu si adag u hananayaa midnimada siyaasadda Dawladda isagoo isku xiraya sarane u qaadaya hawlaha wasiirada.

2)- Wasiirada waxay hagayaan arrimaha ku kooban awoodaha Wasaaradahooda ee mid kasta khusaysa, wuxuuna sidaas darteed mas'uul ka yahay shakhsiyan.
3)- Ra'iisul wasaaraha iyo wasiirada waxay si wada jir ah ma'uul ugu yihiin hawlaha iyo shuruucda Golaha wasiirada.

## QODOBKA 84aad
## CIQAABTA MAS'UULIYADEED EE RA'IISUL WASAARAHA IYO WASIIRADA.

1)- Ra'iisul wasaaraha iyo wasiirada ayaa mas'uul ka ah dembiyada la galo marka ay fulinayaan shaqooyinkooda.
2)- Arrinta la xiriita dembiyada noocyadaasi, waxaa Ra'iisul Wasaaraha iyo wasiirada dembi lagu soo oogi karaa go'aan ka soo baxay Golaha Baarlamaanka oo loo qaaday talo soo jeedin ay soo bandhigeen ugu yaraan shan meelood meel xubnaha Golaha oo cod-bixin qarsoodi ah kadib lagu ansixiyay aqlabiyad dhan 3 (saddex) meelood laba meel ee xildhibaanada; waxaa lagu qaadayaa Maxkamadda ugu sarraysa oo u samaysan sida Maxkamadda sare ee caddaaladda.
3)- Marka laga reebo sida Farqadda kore ku xusan, ma jirto tallaabo dembi ah oo lagu qaadi karo Ra'iisul wasaaraha ama Wasiirada ilaa oggolaanshaha iyo Amarka Golaha Baarlamaanka mooyaane oo loo qaaday cod-bixin qarsoodi ah laguna ansixiyay aqlabiyad dhan seddex meelood laba meel ee xubnaha Xildhibaanda.
4)- Ra'iisul wasaaraha ama Wasiir ay Maxkamadda sare ee caddaaladda ku qaadday dembi uu galay waxaa si toos ah looga qaadayaa gudashada hawlihiisa shaqo.

## QODOBKA 85aad
## AWOOD BIXINTA XEERAR NIDAAM MAAMUL

Xeerarka nidaam-maamuleedyada waxaa lagu bixin karaa Dekreetada Madaxwaynaha Jamhuriyadda iyadoo la raacayo Lana tixgelinayo soo jeedinta ay soo ansixiyeen Golaha Wasiirada. Awoodda bixinta xeerarka ku saabsa arrimo khaas ah waxaa lagu siin karaa sharci Hay'adaha kale ee Dawladda iyo Dadwaynaha.

## QODOBKA 86aad
## MADAX-BANNAANAYTA MAAMULKA

Markii ay suurta-gal naqoto hawlaha maamulka waa la madax-bannnaanayn doonaa waxaana fulin doona Hay'adaha wadaniga ee Dawladda iyo kuwa dadwaynaha.

## QODOBKA 87aad
## MAGACAABIDDA SARAAKIISHA SAR-SARE

Saraakiisha sar-sare iyo Taliyayaasha ciidamada xoogga ee sharcigu qeexay waxaa magacaabaya Madaxwaynaha Jamhuriyadda, iyadoo uu soo jeedinayo Wasiirka ay khusayso ee awoodda u leh ayna soo ansixiyeen Golaha wasiirada.

## QODOBKA 88aad
## SHAQAALAHA DAWLADDA IYO KUWA DADWAYNAHA AMA RAYIDKA.

1)- Shaqaalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka/dadwaynaha waxay shaqooyin-kooda u gudanayaan sida uu qabo sharciga ee ay ku jirto danta guud oo qura.
2)- Shaqaalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka ma noqonayaan madaxda xisbiyada siyaasadeed.
3)- Dabaqadaha/qaybaha shaqaalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka ee aan ka midka ahayn xisbiyada siyaasadda ama aan ku lug lahayn hawlaha kale ee aanay is qaadan karin shaqooyinkooda waxaa qeexi doona sharciga.
4)- Shaqaale Dawladeed ama Rayid kasta ee ku jira fasax ee sabab kastaba lama dallacsiin doono marka laga reebo mid isiyaanato.
5)- Heerka aqoonsiga derejo ee shaqaalaha Dawladda waxaa caddayn doona sharciga.
6)- U magacaabidda jago joogta ah shaqaale Dawladeed waxaa la samayn karaa oo qura kadib marka la qaado tartan dadwaynaha dhexdiisa ah, ilaa xaalado uu sharciga caddeeyay mooyaane.

## QODOBKA 89aad
## GUDDIGA HAY'ADDA DAWLADDA.

1)- Guddiga Hay'ad Dawladeed waxaa dejin doona sharci qeexi doono qaab dhismeedka iyo awoodaha Guddiga.
2)- Sharciga dejinta Guddiga Hay'adda Dawladda ayaa dammaana qaadi doona madax-bannaanida hawlihiisa.

## FARACA III
## LAAMAHA CAAWINTA

## QODOBKA 90ad
## GARSOORAHA XISAABAADKA

1)- Garsoraha xagga xisaabaadka waxuu fulinayaa in uu sii kormeero hubiyana sharci ahaanshaha qawaaniinta dawladda ee khuseeya waajibaadyada lacagta iyo dabagal xisaab hubin ah oo uu ku sameeyo miisaaniyadda dowladda.

2)- Garsooraha xagga xsiaabaadka waxuu, hab sharciga qeexay, uga qayb – geli doonaa kontoroolidda habka maaraynta lacagta ee wakaaladaha ay dowladda u samayso tabarucaad joogta ah, iyo wakaaladaha ay dawladda u samayso tabarucaad badan oo ah tallaabo aan caadi ahayn.

3)- Waxuu u gudbinayaa golaha Baarlamaanka warbixinta ku saabsan natiijooyinka la xisaabtankiisa.

4)- Sharciga ayaa nidaamin doona abaabulka laantani, xaqiijin doontana madax–bannaanida shaqooyinkeeda; waxuu ballaan qaadi doonaa in laamaha iyo wakaaladaha ay ku waajibto in la xisaabiyo ay xaq u leeyihiin in la dhagaysto mar kasta oo dacwad maxkamadeed oo arrintaasi la xiriirta lagu qaadayo.

## QODOBKA 91[ad]
## GOLAHA SHAQADA IYO DHAQAALAHA EE QARANKA

Golaha shaqada iyo dhaqaalaha ee Qaranka waxuu ka koobanaan doonaa, sida ku cad habka shariga, khabiiro iyo wakiilo ka kala socda qaybaha wax soo saarka maalka/hantida dalka oo si isku dhigma, saami ahaa, ugu qaybsan tiro ku salaysan awooddooda iyo muhiimaddooda dhaqaale.

Waxuu naoqonayaa Gole kala taliya Golaha Baarlamaanka iyo xukuumadda/ dowladda xagga arrimaha iyo shaqooyinka uu sharcigu u xilsaaray.

# FARACA IV
# GARSOORKA

## QODOBKA 92[aad]
## AWOODDA GARSOORKA

Awoodda sharciga maxkamadda waxaa iska leh una xilsaaran Garsoorka.

## QODOBKA 93[aad]
## MADAX-BANNAANIDA GARSOORKA.

Garsoorka waxaa uu ka madax-bannaanaan doonaa awoodaha Golayaasha fulinta iyo sharci dejinta.

## QODOBKA 94[aad]
## MAXKAMADDA SARE.

1)- Maxkamadda sare ayaa noqon doonta xubinta ugu sarraysa ee sharciga Maxkamadda ee Jamhuriyadda. Waxay yeelan dootaa awoodda xukumidda arrimaha xagga edaabta, dembiyada, maamulka & xisaabaadka ee Dalaka, iyo arrin kale ee kasta oo ay qeexeen Dastuurka iyo Sharciga.
2)- Nidaamka qaab dhismeed ee Maxkamadda Sare iyo qaybaha kale waxaa qeexi doona sharciga.

## QODOBKA 95aad
## MID AHAANSHA GARSOORKA.

1) Lama samayn doono Maxkamadda aan caadi ahayn ama khaas ah.
2) Waxaa keliya oo la dhisi karaa, oo qayb ka noqonaya, Maxkamaddaha caadiga ah, laamo takhasusi ah oo qaabilsan arrimo khaas ah oo cayiman, ayna kala qayb qaadanayaan, meeshi lagama maarmaan ah, khabiiro muwaadiniin ah oo ka baxsaa ama aan ka tirsanayn Garsoorka.
3) Awoodda xukun ee maxkamadda militiri, waqtiga dagaalka sharciga ayaa dejin doona. Waqtiga nabadda waxay yeelan doonaan awood xukun oo la xiriira oo qura dembiyada militeri ee ay galaan xubnaha ciidamada Qalabka sida (*). (*) sida uu habeeyay sharciga Lr. 6 ee 30 Janaayo, 1963.
4) Dadku waxay si toos ah uga qayb-gelayaan dacwadaha la xiriira (assize) habka uu sharciga u qeexo.

## QODOBKA 96aad
## DAMMAANA-QAADYADA
## SHARCIGA MAXKAMADAHA.

1) Inta ay ku jiraan gudashada shaqooyinkooda sharciyadeed, xubnaha Garasoorka waxay ku ekaanayaan oo keliya sharciga.
2) Xeerarka ku saabsan heerka sharciga ah ee aqoonsiga iyo magacaabida xubnaha Garsoorka waxaa caddayn doona sharciga.
3) Xubnaha Garsoorka lama eryi karo (shaqada lagama saari karo) ama beddeli karo, waxaan ka ahayn xaaladaha sharcigu qeexo.
4) Xubnaha Gadrsoorka waxaa ka reeban in ay qabataan xafiis (xil kale), ay fuliyaan shaqooyin ama in ay galaan hawlo ka hor imaanayo shaqooyinkooda
5) Waxaa, Dekreeto Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ka soo baxday, lagu soo saari doonaa, si uu sharci diyaariyay/qeexay, tallaabooyinka maamulka iyo asluubta ee la xiriira xubnaha Garsoorka, kadib soo jeedinta wasiirka caddaaldda iyo xaqsoorka oo la tashi la yeeshay kana dhegaystay/ aqbalay Golaha Sare ee Maxkamadda sharciga.

## QODOBKA 97aad
## NIDAAMKA SHARCIGA MAXKAMADDA.

1) Qaadista dacwooyinka ee maxkamadda waxuu noqonayaa mid furan; hasa ahaate maxkamaddu waxay go'aansan kartaa, sababa la xiriira xagaa anshaxa, caafimaadaka/nadaafada, ama nidaamka guud awgood, in dacwad qaadista lagu qabto si qarsoodi ah ama khaas ah.
2) Ma jiri doono go'aan Maxkameed oo la qaadanayo ilaa dhinacyada oo dhan ay helaan fursan ay ku soo gudbiyaa/bandhigaan dacwaddooda.
3) Dhammaan go'aanada Maxkamadeed iyo tallaabooyinka ku saabasan xorriyadda shakhsiyadeed oo dhan waxay xusayaan sababahooda, waxaana khasab ku noqonaya in racfaan laga qaato sida sharciga waafaqasan.
4) Booliska iyo ciidamada xoogga waxay si toos ah diyaan ugu ahaanayaan laamaha Maxkamadda si ay u fuliyaan tallaabooyinka ku aaddan shaqooyinkooda.

## QAYBTA V.
## DAMMAANA-QAADKA DASTUURKA.

## CIWAANKA I.
## DIB U HUBINTA DASTUURNIMADA SHARCIYADA.

## QODOBKA 98ad
## DASTUUR AHAASHAHA SHARCIYADA.

1) Sharciyada iyo shuruucda leh awoodda sharciga waxay waafaqsanaan doonaan Dastuurka iyo mabaadi'da guud ee Islaamka.
2) Marka ay socoto dacwad qaadid Maxkamadeed, su'aasha ku saabsan Dastuurka ahaanshaha sharci ama Qodob shuruuc ah oo leh awood sharciyeed, waa la soo jeedin karaa, sida qaabka ama nuxurka, ee habka dacwadda dhinaca ay khusayso ama xafiiska Qareenka, ama Maxkkamadda soo jeedinteeda iyada qudheeda, halka uu go'aanku ku xiranyahay, xitaa haddii uu dhinac keliya yahay, adeegsiga sharciga ama Qodobka shuruucda ah ee laftiisa doodda ka taagan tahay ama la isku hayo.

3) Halka dacwadda uu ka soo gudbiyay xisbiga ama xafiiska xeer Ilaaliyaha Guuda iyadoo kiiska uu laalanyahay ama aan weli go'aan laga gaarin Maxkamadda horteeda ee marka kowaad ama labaad, maxkamaddu, hadday u aragto in dacwaddu aanay si waadix ah sal u lahayn, waa ay joojinaysaa ama dib u dhigaysaa xukunka dabadeedna u gudbinaysaa arrinka maxkamadda sare si ay uga gaadho go'aan waafaqsan Maxkamaddii hore.
4) Haddii dacwad loo gudbiyo Maxkamadda Sare, iyadoo kiisku weli laalan yahay, Maxkamadda Sare, hadday u aragto in dacwadu aanay si waadix ah sal u lahayn, waa ay joojinaysaa ama dib u dhigaysaa xukunka, wayna sii wadaysaa sida uu qabo Qodobka 99aad.
5) Isla habka noocaasi ayaa loo adeegannayaa meeshi su'aasha ku saaban sharci ahaanshaha ay ka soo jeediso Maxkamad mar ama laba jeer tusaale ahaan, ama Maxkamadda Sare, oo ay iyagu iskood u soo jeediyaan mowduuca.

## QODOBKA 99ad
## MAXKAMAD DASTUURI AH.

1) Su'aasha Dastuur ahaashaha waxaa go'aaminaya Maxkamadda Sare oo u samaysan/dhisan sida Maxkamadd Dastuuriga, oo lagu kordhiyay ama lagu daray laba xubnood oo uu Madaxwaynaha ka soo magacaabayo Golaha Wasiirada muddo seddax sano ah, iyo laba xubnood oo uu iyana Golaha Baarlamaanka iska soo dhex dooranayo isla muddadaasi si aqlabiyad buuxda leh.

2) Shuruudaha iyo heerka u qalmidda ee laga rabo xubnaha lgu darayo waxaa qeexi doona sharci gaar ahaaneed.

## QODOBKA 100ad
## XUKUN.

1)- Go'aan ay soo saatay Maxkamadda Sare oo qeexaya in sharci ama qodob shuruuc ah oo leh awood sharci, uusan ahayn Dastuuri, Maxkamadda ayaa u gudbinaysa gaarsiinaysana Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Ra'iisul Wasaraha, waxaana loo daabacayaa habka loo tilmaamay daabacaadda sharciyada.

## CINWAANKA II
## QAADISTA DACWOOYINKA DEMBIYADA LIDDIGA KU AH MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA IYO XUBNAHA DOWLADDA

### QODOBKA 101^ad^
### DACWO

1)- Qodobada dacwad uu soo ansixiyay Golaha Baarlamaanka ee ku cad Qodobka 76^ad^ ama kan 84^ad^ ayaa caddayn dooa qodobada lagu eedaynayo in ay galeen Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama xubin kasta oo dowladda ka tirsan iyo cidii gacan ku siisay haddiiba ay jirto.

2)- Golaha Baarlamaanka ayaa ka soo magacaabaya xildhibaanada dhexdooda amaba bannaanka, hal ama seddax wakiil oo dembiga ku soo ooga kuwaas oo noqonaya ama fulinaya hawsha xeer–ilaaliyaha dowladda dacwad qaadista hortaalla Maxkamadda ugu saraysa oo u samaysan sida Maxkamadda Sare ee Caddaaladda.

### QODOBKA 102^ad^
### MAXKAMADDA SARE EE CADDAALADDA

Maxkamadda ugu sarraysa oo u samaysan sida Maxkamadda Sare ee Caddaaladda ayaa wadaysa qaadista dacwadaha Maxkamadeed iyadoo lagu darayo lix xubnood oo uu Guddoomiuyaha Maxkamadda si bakhtiya–nasiib ah uga soo dhex xulayo, goobta dhagaysiga dadweyanaha, liis laba iyo toban muwaadiniin ah oo u qalma in loo doorto dibutaati ama xildhibaan. Laba iyo tobanka muwaadiniinta ah waxaa soo dooranaya Golaha Baarlamaanka billowga muddo kasta, kuwaasoo laga soo dhex saarayo dad aan xubno ka ahayn Golaha.

### QODOBKA 103^ad^
### HABKA ABAABULKA

1)- Qodobada shuruucda ee xukumaya dacwa qaadista la hor geeya Maxkamadda ugu sarraysa ee u dhisan sida Maxkamadda Dastuuriga ah ama Maxkamadda Sare ee Caddaaladda waxaa dejin doona sharciga.

2)- Maxkamadda iyada ayaa samaysan doonta qawaaniinteeda Maxkamadeed ee dhagaysiga dacwadaha.

## CINWAANKA III
## DIB U HABAYNTA DASTUURKA

### QODOBKA 104ad
### WAX KA BADELIDDA IYO
### WAX KU DARIDDA DASTUURKA

Wax ka beddelidda ama wax ku daridda Qodobada Dastuurka waxaa go'aamin kara Golaha Baarlamaanka oo u baahan ugu yaraan shan meelood meel xubnaha Golaha, ama dowladda ama 10,000 qof oo xaq u leh cod–bixin, oo markaasi loo qaadayo wood laba jeer oo isku xigta una dhaxayso muddo aan ka yarayn seddex bilood, sidaasna lagu ansixiyo iyadoo looga baahan yahay woodka koowaad aqlabiyad buuxda ee xildhibaannada kan labadaana seddax meelood laba meel.

### QODOBKA 105ad
### XADKA WAX KA BEDDELIDDA DASTUURKA

Dastuurka looguma samaynayo wax ka beddelidda ku xusan qodobka hore sabab ku saabsan dib u habaynta qaabka demoqaraadiyadeed ee dowladda ama in lagu xadaynayo/xannibayo xuquuqaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee muwaadinka iyo kuwa uu dastuurku nin/qof u dammaana–qaaday awgood.

### QODOBADA KMG IYO KAMADAMBAYSTA AH

### I)- SI KMG AH U ADEEGSIGA AWOODAHA:

1)- Ilaa magacaabidda Madaxweynaha KMG ee Jamhuuriyadda, oo dhici doonto inta ka horraysa ama ugu dambayn 1da Luulyo 1960, awoodaha iyo shaqooyinka uu Dastuurka xaqa u siinayo Madaxweyenaha Jamhuuriyadda, waxaa sii wadaya fulinayana Guddoomiyaha Golaha Sharci dejinta (Baarlaanka) oo sii haynaya xilka Madaxweynanimada KMG ee Jamhuuriyadda, marka laga reebo awoodda lagu cayimay farqadda 1ad ee qodobka 53aad. Waa uu dhaqan–gelinayaa dastuurkan.

2)- Isla marka la saxiixo sharciga Midowga ee labada gobol ee Soomaaliyeed (Somaaliya iyo Somali land), Golaha cusub ee Baarlamaanka waxay dooranayaan, sida habka lagu qeexay farqadda 2ad ee qodobka 70ad, Madaxweyne KMG ah ee Jamhuuriyadda, kaasoo ku sii baaqi ahaanaya xafiiska ilaa doorashada Madaxweynaha 1aad (koowaad) ama Madaxweynaha kale ee KMG ee lagu tilmaamay farqadda 1ad ee qodobka Lr. IV

## II)- MADAXWAYNE KMG AH:

Madaxweynaha KMG ah waxuu adeegsanayaa dhammaan awoodaha uu dastuurku siinayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda marka laga reebo awoodda lagu caddeeyay qodobka 53ad oo qura, iyadoo uu dakareeto ku cayimi doono taariikhda la qabanyo aftida oo lagu faah–faahiyay qodobada shuruucda ee soo socda

## III)- DHAQN–GALKA DASTUURKA IYO AFTIDA:

1)- Waxuu dastuurkani si KMG ah u dhaqan–galayaa 1da Luulyo 1960, waxaana hal sano gudahii ee taariikhdan oo kale, loo gudbin doonaa afti shaacsan oo loogu yeeri doono dhammaan cod–bixiyayaasha in ay ka qayb–qaataan.

2)- Dhammaan cod–bixiyyaasha waxay xaq u leeyhihiin in ay muujiyaan dareenkooda oggolaanshaha ama diidmada dastuurka si hab xor, toos iyo qarsoodi ah oo waafaqsan sharci khaas ah oo loo sameynayo aftiqaadista.

3)- Nidaamsanaanta hawlgallada afti–qaadista waxaa xaqiijinaya Maxkamadda ugu sarraysa oo ku go'aamin doonto arrintan muddo aan ka yarayn toban beri, kana badnayn soddon beri ka dib marka ay xiranto doorashada. Maxkamadda ugu sarraysa waxay sidoo kale go'aaminaysa wixii cabasho ama racfaan kasta ee dhici kara in loo soo gudbiyo, iyadoo go'aanka noocani uu noqonayo kama dambays. Marka ay bixiso amarka sugitaanka, Maxkamaddu waxy sidoo kale shaaci–ka–qaadaysa natiijooyinka aftida.

4)- Haddii aysan bixin sugitaan, afti cusub ayaa la qabanayaa muddo seddax bilood gudahood ah ee taariikhda go'aanka Maxkamadda.

## IV)- NATIIJOOYINKA AFTIDA:

1)- Hadii ay natiijooyink aftida liddi ku noqdaan dastuurkan, golaha Baarlamaanka waxay, muddo shan iyo toban cisho gudahood ah, ee marka ay Maxkamadda ugu sarraysa shaaca ka qaaddo natiijooyinka, ku dooranayaan Madaxweyne cusub oo KMG ah ee Jamhuuriyadda, waxayna ku dhawaaqayaan in kii hore aanu sii hayn doonin xafiiska; xubnaha Goluhu ka koobma waxay isla markaasba amar ku bixinayaan in la sameeyo dastuur cusub oo loo gudbin doono in afti loo qaado lix bilood gudahood oo xigta magacaabidda Madaxweynaha cusub ee KMG.

2)- Haddii ay natiijooyinka afti–qaadista noqodaan oggol, waxaa dastuurkan loo qaadanayaa kama damays, waxayna golaha Baarlamaanka, muddo 15 beri gudahood ah, ku soo dooranayaan Madaxwaynaha Jamhuuriyadda si waafaqsan dastuurkan.

## V)- QODOBKA UGU DAMBEEYA:

1)- Ilaa shaaca laga qaado natiijooyinka afti–qaadista, qoraalka qodobada ee dastuurka waxaa lagu dhejinayaa golayaasha iyo marinada magaalooyinka iyo xafiisyada gudoomiyayaasha degmooyinka dalka si uu muwaadin kasta u fahmo una garto.

2)- Waa in dhammaan qaybaha dowladda/dalka iyo dadka ku hoos jira Qaranimadiisa oo idil ay si daacadnima ah u ilaaliyaan in dastuurku yahay sharciga asalka ah ee Jamhuuriyadda.
Dastuurka oo ku naqshadaysan shaabadda qallalan ee dowladda, waxaa lagu darayaa kaydka rasmiga ah ee sharciyada iyo dekereetooyinka Jamhuuiyadda Soomaaliya.

Muqdisho, 1da Luulyo 1960

1)- Aadan Cabdulle Cusmaan
Madaxweynaha Golaha sharcidejinta.

2)- Cabdullaahi Ciise Maxamuud
Ra'iisal asaare

3)- Maxamed Sheekh Gabiyow
Wasiirka Dastuurka

4)- Sheekh Maxamuud Maxamed Faarax
Wasiirka Caddaaladda

## 115- NATIIJOOYINKA AFTI-QAAISTA DASTUURKA SOOMAALIYA 24 JUUNYO, 1961:

| Gobolka Banaadir | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **X/T** | **Gob. Banaadir** | **Goob cod bixin** | **Haa** | **Maya** |
| 1 | Muqdisho | 155 | 26,804 | 15,217 |
| 2 | Marka | 151 | 87,443 | 10,601 |
| 3 | Baraawe | 132 | 70,911 | 1,599 |
| 4 | Afgooye | 134 | 77,627 | 895 |
| 5 | Walla – wayn | 130 | 68,994 | - - - |
| 6 | Jawhar | 140 | 83,414 | 4,234 |
| 7 | Balcad | 131 | 38,461 | 12,553 |
| 8 | Aadan Yabaal | 136 | 68,354 | 3,684 |

| X/T | G/Jubada Hoose | Goob cod bixin | Haa | Maya |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Kismayo | 130 | 40,302 | 4,640 |
| 2. | Jammaame | 134 | 60,975 | 2,692 |
| 3. | Afmado | 120 | 34,469 | 1,442 |
| 4. | Jilib | 155 | 26,804 | 15,217 |

| X/T | Gobolka J/sare | Goob cod bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Baydhabo | 150 | 114,441 | 213 |
| 2. | Buur Hakabo | 141 | 87,351 | 97 |
| 3. | Luuq | 132 | 70,105 | 543 |
| 4. | Xuddur | 131 | 65,883 | 124 |
| 5. | Diinsoor | 127 | 60,147 | 369 |
| 6. | Baardheere | 129 | 53,831 | 1,156 |

| X/T | Gobolka Hiiraan | Goob cod bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Beled Wayne | 134 | 6,930 | 9,359 |
| 2. | Buula Burde | 137 | 7,366 | 14,194 |

| X/T | Gobolka Mudug | Goob cod bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Gaalkacyo | 130 | 43,476 | 9,658 |
| 2. | Dhuuso mareeb | 126 | 23,098 | 2,589 |
| 3. | Ceel Buur | 131 | 52,598 | 3,589 |
| 4. | Hobiyo | 126 | 29,716 | 2,519 |

| X/T | G Majeerteeniya | Goob cod bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Boosaaso | 120 | 29,169 | 12,308 |
| 2. | Qandala | 120 | 42,035 | 1,924 |
| 3. | Caluula | 124 | 54,641 | 44 |
| 4. | Iskushuban | 130 | 63,298 | 4,484 |
| 5. | Qardho | 135 | 78,190 | 2,198 |
| 6. | Eyl/Garowe | 140 | 78,876 | 4,977 |

| No. | Gobolka Hargaysa | Goob cod-bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Hargaysa | 143 | 10,449 | 27,087 |
| 2. | Berbera | 117 | 2,220 | 5,231 |
| 3. | Borame | 125 | 14,380 | 522 |

| No. | Gobolka Burco | Goob cod-bixin | Haa. | Maya. |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Burco | 126 | 6,427 | 12,868 |
| 2. | Laas caanood | 118 | 12,090 | 2,553 |
| 3. | Ceeri-gaabo | 123 | 3,950 | 6,019 |

**Natiijooyinka guud.**

| X/T | Haa | Maya |
|---|---|---|
| 1. | 1,724,073 | 182,550 |

## 116- GO'AANKA MAXKAMADDA UGU SARAYSA EE ANSIXINTA DASTUUKA SOOMAALIYA

### MUQDISHO, 4 LUUYO 1961.
### Go'aanka ugu sarreya.

Maxkamadda ugu sarraysa oo yeelatay fadhiyo isku xiyan/midaysan; waxay shaki la'aan, kadib marki ay dhagaysatay gabagabooyinkii Xeer Ilaaliyaha Guud ee ku aadanaa waajibaadyadii lagu aaminay sida ku cad farqadda 3$^{aad}$ ee Qodobka III ee Qodobada KMG iyo Kama dambaysta ah ee Dastuurka: -

- Xaqiijinaysaa go'aamada xafiiska dhexe ee Afti-qaadista kuna saabsan cabashooyinka ay qaar u soo jeeediyeen xafiisyada Degmooyinka Marka, Afgooye, Beledwayne, Dhusa-marreeb iyo Ceel-Buur;

- Qaadacaysaa cabashooyinka ay sida tooska ah u soo gudbiyeen xisbiyada kala ah G. L.S, S.N.L. iyo U.S.P;

- Caddaynaysaa shaarci ahaanshaha hawl-fulinti Afti-qaadista, waxayna shaaca-ka-qaadaysaa sida soo socota natiijooyinkii la tashiyadii caanka/waafiga ahaa:-

| | |
|---|---|
| **Inta wax dooratay------- ---** | **1,948,348** |
| **Inta oggolaatay Dastuurka----** | **1,756,216** |
| **Inta diiday Dastuurka-----** | **183,000** |
| **Xaashiyaha xummaday---** | **9,132** |

## DHAMMAAD

**Waxaa turjimay**
**G/le-sare-Axmed Budul Hilowle**

**Baydhabo; 25/05/07**